

**BARNIMISH SAAMEYNAYA  
IRELAND OO DHAN OO KU SABSAN  
WAALIDKA DIBADA KA YIMID**



**WARBIXIN KU SAABSAN  
IRELANDA**

## MAHADNAQ

Habkii loosoo ururiyey wargalintan waxaa isukeenidiisii ka qayb qaatay dhinacyo farabadan oo aanu jecelahay inaanu uga mahad celino taageeradii ay ka geysteen.

Marka hore waxa aanu jecelahay inaanu u mahadcelino dhanwalba labada xad deeqbixiyayaasha mashruucan oo noogu deeqay agabka si loo hirgaliyo.

Marka labaad waxaanu jecelahay inaanu u mahad celino xubnaha gudida maamulka mashruuca oo u lumiyey wakhtigoodii kuna taageeray in la hirgaliyo qalabkan.

Marka sadexaad waxaanu mahad u celinaynaa talo bixiyayaashayada oo isugu jira shaqaale iyo waalidiin oo labada dhinac ee xuduudkaba ka kala socda badankooduna ay iyagu yihiin dad soo guuray.

Waxaanu kale oo aanu gaadhsiinaynaa mahadcelintayada dhamaan dadkii ka soo dhiibtay waxna kaga darsadey qaybo dhowr ah mashruucan oo uu ka mid yahay Barnandos Tuar Ceatha, xafiiska wasiirka xidhiidhka, ururada wada jirka kala duwan ee waqooyiga Ireland iyo warbixiya yaasha gudaha hay'adda caruurta ISPCCC.

Waxaanu u mahadcelinaynaa dhamaanba shaqaalihii, waalidiintii iyo da' yartii ka qaybqaadatay xugraadintayadii Ireland iyo Internetkaba. Waad mahadsantihii dhamaantiinba.

Ugu dambeynna dhamaan cidwalba oo gacan naga siisay sidii uu ku hirgalay mashruucani.

Fiona Dwyer(dhamaan ipipisuduwaha mashruuca ISPCCC)

Mary Nicholson (dhamaanipipmadaxa mashruuca iyo madaxa garwadeenada ISPCCC)

## HORDHAC

Dhamaan mashaariicda waalidiinta ee u soo guurta Ireland waa mashrooc 24 bilood ah oo loogu talogaley inuu ka caawiyo waalidiinta iyo waalidnimadaba dadyowga u soo guura Ireland.

Faahfaahintani waxa uu ka mid yahay sadex qaybood oo isla mashruucan ah.

Faahfaahintan waxa loogu talo galey qoraal ahaan inay waxtar ka siiso noloshu Ireland, waxaana uu u kala baxa yaa 6 qaybood oo akhbaar diyaarsan ah waxaana uu xidhiidh la leeyahay qaybo kale oo iyaguna faahfaahsan.

Qayb walibana waxay u qorantahay si gaar ah haddii anad u baahneyn inta kale waxaad toos u tagi kartaa qaybta aad u baahantahay.

### QAYBTA 1AAD:

Noloshu Ireland- faahfaahin kooban

### QAYBTA 2AAD:

Noloshu Ireland- akhbaarta rasmiga ah

### QAYBTA 3AAD:

Akhbaarta sharciyada

### QAYBTA 4AAD:

Caafimaadka iyo arrimaha bulshada

### QAYBTA 5AAD:

Waxbarashada

### QAYBTA 6AAD:

Ciyaaraha iyo firfircoonida bulshada

Qaybahani oo dhama waxay u sii kala baxayaan qodobyo kala duwan oo noqon doona su'aalo iyo jawaabo oo sigaara u faahfaahsan, tani waxa ay si fudud kuu siinaysaa inaad heshid cinwaankii aad doonaysay. Marka ay dhamaadaan 6da qaybood waxa aad tagi kartaa liis ay ku xusan yihiin xuruufta iyo qaybaha kala gedisan ee la soo isticmaalay.

## TUSMO

### QAYBTA 1:

Nolosha Ireland- Faahfaahin Kooban ..... 5

### QAYBTA 2:

Nolosha Ireland - Akhbaarta Rasminga Ah..... 9

### QAYBTA 3:

Sharciyada..... 17

### QAYBTA 4:

Caafimaadka Iyo Arrimaha Bulshada ..... 21

### QAYBTA 5:

Waxbarashada Waqooyiga Irishka ..... 29

### QAYBTA 6:

Ciyaaraha Iyo Firfircoonida Bulshada..... 39

### SOO KOOBID

..... 41

### ODHAAHO IYO CINWAANO

..... 42

### ISTICMAALIDA AFKA IRISHKA MARKA IRELAND LA JOOGO

..... 42





## XAGGE AYAAN KA HELA?

- Warbixin ku saabsan dowlada ..... Eeg Qaybta 1
- Warbixin ku saabsan shicibka? ..... Eeg Qaybta 1
- Warbixin ku saabsan bilisha? ..... Eeg Qaybta 2 1
- Warbixin ku saabsan kirada? ..... Eeg Qaybta 3
- Warbixin ku saabsan xaquuqda caruurta ..... Eeg Qaybta 3
- Warbixin ku saabsan dhibta guriga? ..... Eeg Qaybta 3
- Warbixin ku saabsan talaalka? ..... Eeg Qaybta 4
- Warbixin ku saabsan kormeeridda? ..... Eeg Qaybta 4
- Warbixin ku saabsan casharka guriga ..... Eeg Qaybta 4
- Warbixin ku saabsan edaabta iskuulka? ..... Eeg Qaybta 5
- Warbixin ku saabsan dhaqanka? ..... Eeg Qaybta 6
- Warbixin ku saabsan rugta buggaagta ..... Eeg Qaybta 6



## FAAHFAAHIN KOOBAN

Ireland waxa kalo loo yaqaana Éire oo waxaad arki doontaan iyado meelo badan ku qoran sida tidhida warqadaha lagu diro Matalan. Waa magaca Irish u yaqaanan Ireland.

Ireland waa wadan dastuur ku dhaqan dastuur kaasina wuxu hir galay 1937.

Shicibka Ireland waxa weeyan 4 million (tira koobki 2006)

Magalo madaxa Ireland waa Dublin, oo loo yaqaano Baile Atha Cliath afka Irish.

Lacagta Ireland waa Euro, waxa loo qora sidan € ayaa laga horaysiia qiimaha. Ireland waxay ogalotay Euro 2002;

Afka Ireland lagaga hadla waa English iyo Irish (waa la yidhaahdo Gaeilge ama Gaelic)

Meelaha magacdoodu waxay ku qoran yihin Irish iyo English.

## JUQRAAFIGA IRELAND

### HALKEE AYAY KU TALAA IRELAND?

Ireland waxa weeyan gasiirad ku taala waqooyiga galbeed ee Europe. Bariga waxa ka xigga United Kingdom waa badda la yidhaahdo Irish Sea ay u dhaxayso.

Jamhuriyadda Ireland waxay buxisa marka gasiraada 6 qaybood laga dhigo 5 qaybood Northern Ireland waxay buuxisa qaybta lixaad ee hadhay.


### Sidee ayay Ireland u kala qaybsantaa?

Jamhuriyadda Ireland waxay u kala baxdaa 26 degmo oo ku dhex yaala 4 gobol oo Ireland ku yaala.



## GOBALADA IRELAND

- 1 – Leinster
- 2 – Munster
- 3 – Connaught
- 4 – Ulster



## LEINSTER

Gobolka Leinster oo ku yaala bariga wadanka oo ay ku yaalan degmoyinka kala ah Carlow, Dublin, Kildare, Kilkenny, Laois, Longford, Louth, Meath, Offaly, Westmeath, Wexford and Wicklow.

Magac	Magac Irishka	Degmo
Carlow	Ceatharlach	Carlow
Dublin	Baile Átha Cliath	Dublin
Kildare	Cill Dara	Naas
Kilkenny	Cill Chainnigh	Kilkenny
Laois	Laois	Portlaoise
Longford	Longfort	Longford
Louth	Lú	Dundalk
Meath	Mí	Trim
Offaly	Ua Fáilghe	Tullamore
Westmeath	Iarmhí	Mullingar
Wexford	Loch Garman	Wexford
Wicklow	Cill Mhantáin	Wicklow

## MUNSTER

Gobolka Munster oo ku yaala konfurta wadanka oo ay ku yaalan degmoyinka ah Clare, Cork, Kerry, Limerick, Tipperary iyo Waterford.

Magac	Magac Irishka	Degmo
Clare	Clár	Ennis
Cork	Corcaigh	Cork
Kerry	Ciarraí	Tralee
Limerick	Luimneach	Limerick
Tipperary	Tiobraid Arainn	Clonmel
Waterford	Port Lairge	Waterford

## CONNAUGHT

Gobolka Connaught oo ku yaala galbeedka gasiirada oo ay ku yaalan degmoyinka Galway, Leitrim, Mayo, Roscommon iyo Sligo.

Magac	Magac Irishka	Degmo
Galway	Gaillimh	Galway
Leitrim	Liatroim	Carrick-on-Shannon
Mayo	Maigh Eo	Castlebar
Roscommon	Ros Comán	Roscommon
Sligo	Sligeach	Sligo

## ULSTER

Gobolka Ulster oo ku yaala waqooyiga gasiirada. Ulster inteeda badan waxay ka mid tahay Northern Ireland. Jamhuriyadda Ireland degmooyinkeeda Ulster ku yaala waa Cavan, Donegal iyo Monaghan.

Magac	Magac Irishka	Degmo
Cavan	Cabhán	Cavan
Donegal	Dún na nGall	Lifford
Monaghan	Muineacháin	Monaghan

## TARIIKHDA IRELAND OO LA SOO KOOBAY

### Wa Maxay Tariikhda Ireland?

Ireland Waxay Leedahay Tariikh Dheer Oo Ka Horaysa 7 000 Sannadood Nabi Ciise Dadki Ugu Horeeyey Ee Ku Oola Waxa Loo Maleeya Inay Ka Yimaadeen Scotland Oo Ku Taal Great Britain/

Ireland Waxa Soo Weraray Dad Kala Duwan Oo Ay Ka Mid Yihin Celts, Vikings, Normans Iyo English.

Ingiriisku Wuxu Xukumayay 800 Sannadood Ilaa Inta Dhacday Wuxii La Odhan Jiray Easter Rising Oo Ahayd 1916 Markii Ay Dadka Gobanimoo Doonka Ahi Yidhaahdeen Ireland Waa Jamhuryad Xor Ah..

1920 Sharci Laa Ogan Jirah Government Of Ireland Act Aya Gasiraada Ireland U Kala Jaray Laba Qaybood (6 Degmo Oo Ku Taala Waqoyi Bari) Iyo Southern Ireland (26 Degmo Ee Kale). 26 Degmo Dintoodu Waa Diin La Yidhaado Catholic Lixka Degmo Ee Kale Dintoodu Waa Protestant.

1921 Northern Ireland Aya Si Rasmi Ah Uugu Biirtay Great Britain Iyada Oo Tix Racaysa Sharciigi Ahaa Government Of Ireland Act Marka Waxa Loo Ogalaaday Maamul Gooni ah.

1922 W.T. Cosgrave ayaa noqday madaxweynihi ugu horeeyey ee dawlada horta ah ee Ireland.

1937 dowlada cusub ayaa baabisay wuxi laa odhanjiray dowlada xorta ah ee Ireland oo ku dhawaaqday Ireland (Eire) oo ah wadan madax banaan oo dimuqraadi ah oo ka xor ah maamulkii Britishka.

1959 waxay ku biirtay Jimciyadda Qurumaha ka dhaxaysa.

1973 Ireland waxay ku biirtay Ururka Reer Europe ee loo yaqaano European Economic Community (ama European Union)

2002 Ireland aya ku birtay wadanada isticmaala lacagta Eurooga (€).

## DOWLADA

Dawlada waxa u madax ah Madaxweynaha (Uachtàrain afka Irishka)

Xukumada waxa u madax ah Taoiseachka. Waxa ku xiga Tanàistka.

### Side loo doorta Taoiseachka ?

Taoiseachka waxa magacaaba madaxweynaha marka ay u soo magacaabo Dàil Eireannka . Mar walba waa inay kalsooni ka haystaan dadka shicibku doortay.

### Maxa la yidhaahda Barlamanka wadanka ?

Barlamaanka Ireland waxa loo yaqaana Oirechtas waxana u kaa kooban yahay laba waaxood. Ka hore waxa loo yaqaana House of Representatives ama afka Irishka Dàil Eirann ka labaad waa loo yaqaana the Senat ama afka Irishka Seanad Eireann.

Waa magacood xusbiyada ugu caansan Ireland ?

Xusbiyada Ireland waxa lakala yidhaahda Fianna Fàil, Fine Gael, Labour, Sinn Fein, Green Party, Progressive Democrats iyo Socialist Party.

### Maxaa la yidhaada daadka ay shicibku u codeeyen ?

Dadka ka tirsan Dàil Eireann, (House of Representatives) waxa loo codeeya marka dadka oo dhan laa iskugu yeedho (General Election afka qalaad loo yaqaana). Shan sannadood ayay kursiga hayn. Waxa loo yaqaana Teachta Dàia (waxay ka tirsan yihin barlamaanka ayah ka dhigantahay) marka la soo gaabiyo waxa loo yaqaana TD. Matalan Brian Lehiha, TD oo ah wasiirka maaliyadda.

Dàil waxa ay ka kooban yihiin 166 qof oo marka ah TDs. Seanad Eirann waxay ka qabgala 60 qof.

### Ma codeeyn kara ?

Dadka dhalashada Irishka haysta way codeey karan. Haddi aad dhalasho UK haysato, waxaad ka codeeyn karta doorashada barlaamka European Unionka iyo doorashada dowlada hoose. Shicibka EU waxay ka codeeyn karan codeeynta Barlamaanka Europe iyo codeeynta dawlada hoose. Dadka aanan ka tirsanayn shicibka EU waxay ka codeeyn karan doorashada dowlada hoose oo keliya..

## DADKA KU NOOL WADANKA

### Waa intee shicibka ku dhaqan Ireland?

Waxa weeyan 4 239 848 qof '(tiradi ugu dambeysey 2006).

4 239 848 2 121 171 qof waa rag, 2 118 677 waa haween.

### Marka la isku daro:

- 864 449 waxa u dhexeeyan 0 – 14 jir
- 632 732 waxay u dhexeeyan 15 – 24 jir
- 1 345 873 waxay u dhexeeyan 25 – 44 jir
- 928 868 waxay u dhexeeyan 45 – 64 jir
- 467 926 waxay ka weyn yihiin 65 jir.

### Magaladee ugu weyn?

Dublin aya ugu weyn, iyada aya ugu dad badan. 1 187 176 qof aya ku nool Dublin in badan oo kale aya ku nool magalada agagarkeeda.

### Magaladee ku xigta oo ugu dad badan?

Marka dib loo raaco tira koobki ugu danbeyey e ka soo baxay xafiiska Statistiga ee loo yaqaano Central Statistics Office (CSO), magalada labaad ee ugu dad badan waa Cork; Waxa ku nool 481 295 qof.

## LACAGTA

Ireland waxay kaa mid tahay Eurozone waxay bilowday lacagan isticmaalkeeda, bishi koobad ee sannadki 2002 (01.01.2006).

Lacagta Euro maxay u eegtahay?

Todoba nooc oo oo lacacta warqada ah aya jirta Ireland.

€500, €200, €100, €50, €20, €10 iyo €5



Caankee ayah lacagta dhagax ahi u eegtahay?

8 lacagayow oo kala duwan aya jira.



€2, €1, 50c, 20c, 10c, 5c, 2c i 1c

Lacagta ta ugu yar waxa lagu biriya c; C waxay ka dhigantahay cent markaa 100 cent aya hal euro ah.

## ADRESYO MIHIM AH

Hadi aad doneyso inaad wax ka birsato giografiga Ireland

[Department of Environment, Heritage and Local Government](#)

Telefoonka: 1890 20 20 21

Website: [www.environ.ie](http://www.environ.ie)

Hadi aad doneyso inaad wax ka birsato tariikhda Ireland

[Irish History online](#)

Website: [www.irishhistoryonline.ie](http://www.irishhistoryonline.ie)

Hadi aad doneyso inaad wax ka biirsato dawlada Ireland:

[Websiteka xukumada Ireland](#)

Website: [www.irlgov.ie](http://www.irlgov.ie)

[Oireachtas \(Barlamaanka\)](#)

Adress: Leinster House

Dublin 2

Telefoonka: (01) 618 3000

Email: [info@oireachtas.ie](mailto:info@oireachtas.ie)

Website: [www.northernireland.gov.uk](http://www.northernireland.gov.uk)

Hadi aad doneyso inaad wax ka biirstato shicibka ku dhaqan Ireland Xafiiska tirokobka ee loo yaqaano

[Central Statistics Office](#)

Website: [www.cso.ie](http://www.cso.ie)





## GURYAHA

Intee nooc oo kiro ah aya laga hela Ireland?

Saddex ayayu kala kacaan guryuhu.

- Guri shicib ka kireeyo
- Guri dowladu ay leedahay
- Guri aad qofku leeyaha

Qofku marku wadanka soo dego u yahay sharci doon ama afka ingiriiska lugu yidhaahdo asylum seekers, dowlada aya siisa guri. Laakin marka qofku u helo sharci waa inu isagu guri doonta.

Guryahu waxa aay u badan yihin qaar aay dadku kiraystaan iyo kuwo dadku leeyihin.

## GURIGA SHICIBKA LAGA KIRAYSTO

Halkee ayan ka kiraysan karaya guri?

Meelo badan aya jirta oo laga kiraysan karo guri. Waxa lagu soo qora jariiddada, waxa jira website ay ku qoran yihin dad doonaya inay guri kireyaan ama qof ay la qaybsadan. Laba aya ugu caansan, waa kuwan magacyadoodu: [www.daft.ie](http://www.daft.ie) iyo [www.myhome.ie](http://www.myhome.ie)

Imisa nooc ayay u kala baxaan guryaha la kiraystaa?

Guryaha la kiraystaa way badan yihin. Qaar way balaadhan yihin, house aya la yidhaahda, qarna guryo kooban weeyan, waa foq dad wada galan. Qaarna waa guryo casri ah, oo loo yaqaano af ingiriiska apartment.

Waa maxay guryaha la yidhaahdo bedsit?

Bedsit waxa la yidhaahda, meel makhsinka la seexo iyo makhsinka fadhigo isku mid yihin. Jikadu ama madbaku iyo beitelmeigu way kooban yihin.

Miyaan u bahanahay inaan soo qado finijar ama alaab?

Guryuhu inta badan way alaabeysan yihin, alaab kooban aya taala. Laakin waa la heli kara guri aanan alaabeysneyn.

Goorma aya la bixiya kirada?

Inta badan waxa lagu bixiya bil, laakin waxa ay ku xidhantay qofka aqalka kaa kireeyey.

Liiska ama af Ingiriiska Lease maxa la yidhaahda?

Liisku waa heshiis dhex mara ama ay kala sexeexdaan qofka guriga kiraysa iyo qofka guriga leh. Waa warqaad sharci. Wa inay ku qornaadan waxyaabo ay ka mid yihin:

- Magaca qofka kiraysanaya iyo magaca qofka kiraynaya
- Inta ay kiradu tahay
- Adreska u gurigu ku yaalo
- Muddada kiradaas ay soconayso
- Alaabta taala iyo wuxi kale guriga laga helo.

Buggu kiradu wa maxay?

Wa buug ay waxa kor ku qooraan oo dhan ay ku yaalan, iyo kirada aad bixiso bilwalba. Xeer ayaad u leedahay, qofka guriga kaa kireyey inu ku siiyo.

Maxa la yidhaahda dhiiposit?

Waa lacag bil kiradeed u dhiganta (way ka badnaankarta) oo aad ku khasban tahay inaad dhigto marka aad aqal kiraysanayso. Qoofka aqalka lihi wu ku dhigaya waanu ku celinaya marka aad ka baxayso guriga, hadi aadan wax dhibaato ah gaadhsiin guriga. Hadi aad adigoon ogaysiis si bixin aad ka bax do guriga, lacagta waa laga haysanay.

Maxa dhacaya haddi ay ilaa noqoto inuu qofkaan aqaalka ka kiraystay si xun ilaa dhaqmo?

Haddi aad dareento inuu qofkaad aqalka kaga jirta guriga aanu si wacan ka dhigin waxaad la hadli karta dawlada hoose.

Waxa jirta waxyaabo ah inuu guriga yeesho. Sharciy cusub aya soo baxaya (2009) oo ku dadaalaya sidi ay guryuhu intaa kooban guriga laga rabo inuu yeesho.

Faahfaahin inta ka badan waxaad ka heli karta iyo sidi aad u caban lahayd haddi uu guriga qofkaad kaga jirta si xun kuula dhaqmo meesho la yidhaahdo The Private Residential Tenancies Board, Floor 2, O'Connell Bridge House, Dublin 2.

Ama telefoonka : (01) 6350600

Internetka: [information@prtb.ie](mailto:information@prtb.ie)

Inta aadan cabashada soo ban dhigin waxaad habsata inaad jabin xeerka guriga u yaala, inaad kirada si joogta ah u bixiso.

## GURYAHA QOFKU ISAGU LEEYAHAY

Maxa jira haddi aan doonayo inaan guri ama apartment iibsada?

Guri iibsigu Ireland waa qaali. Guryaha intooda badan waxa laga iibsada dad la yidhaahdo estate agents ama dilaal, waxana jira estate agents badan Ireland. Waxay ku shaqo leeyihin guri kala ibsiga.

Sidee ayaan u iibsan kara guri ama apartment?

Guri ama apartment waa qaali Ireland Dadka intooda badan waxay ku iibsadaan amaah iyago lacag ka amaahanaya Bangiga ama shirkad dhismo.

Amaahda oo afka ingiriiska lagu yidhaahdo mortgage waxa lagu bixiya 20 ama 30 sannadood. Amahda waxa walibo dul socota lacag aad bil walba bixindoontid.

Intaanu bangigu dadka lacagta amaahin, waxay isku eegayan inay ogaadan inu qofka lacagta amaahanaya bixin kari doono amahdaas. Waxay kalo ay codsan doonan dhibosit ah 10%. Waxaad ka heli karta faahfaahin inta ka badan bangiga (Waxaad eegta qaybta bangiga ku saabsan)

Maxaan cashuur bixin doona?

Lacagtaa amahda maahe, oo iyaadu joogta ah waxa jira wax laa yidhaahdo fii ama cashur oo ah inaad bixiso marka aad aqal ibsanays

- Stamp Duty – ayaa jira oo ah lacag dowladu aay ka qaado oo ku xidhan qimaha aqalka, iyo haddi aad aqal hore iibsatay (meeshi aay doonta adunka) iyo aqalku intuu leeg yahay. Faahfaahin intaa ka badan waxaad ka heli karta, iyo waliba qimaaha aqalo ka duwan, internet adreska ah “<http://www.revenue.ie>”
- Estate agent – waa dilaalka adiga iyo qofka aqalka iibinaya idin dhexeeya, dilaal walba qimo ayuu leeyahay, marmar qiimaha aqalka ayay ku dhex jirta, laakin mar walba sidaas ma aha.
- Legal fees – waa lacagta cashur ah oo ay qaatan nootayadu. Qimo go'an maha. Way fiican tahay inaad notaayo samaysato ama looyar markaad guri ibsanayso, waa ka cawin karan wuxi sharci ah.

## **GURYAHA DOWLADA HOOSE**

**Waa maxay guryaha dowlada hoose?**

Dowlada hoose guryohoodu waa kale oo loo yaqaano guryaha soshalka waxaanay u banaan yihin dadka sida rasmiga ah u dagan Ireland (waa eegtaa “maxa la yidhaahda qof si rasmi ah u degan” xashida 56) oo bahan guri awoodna aanan u haysan inay ibsadan.

Uurrada guryaha iyo iskaashatooyinka guryuhu way bixiyaan guryaha soshalka ah.

**Sidee ayan u dalban kara guri soshal ah?**

Waxaad ka dalban karta dowlada hoose ee eriyada aad degan tahay ku taala. Waxaad heeli ka heeli karta ka kuugu dhow t:

[www.environ.ie/en/LocalGovernment/LocalGovernmentAdministration/LocalAuthorities](http://www.environ.ie/en/LocalGovernment/LocalGovernmentAdministration/LocalAuthorities)

Uurka guryaha ka kuugu dhow waxaad ka heli karta adreska internet ah: [www.icsh.ie/eng/members](http://www.icsh.ie/eng/members).

**Sidee loo garta qofka la siin karayo guri?**

Guryaha waxa loo bixiya sidi ay baahidu u jirto kiraduna waxay ku xidhan tahay inta aad bixin awoodi karta. Haddi aad is leedahay xeer ayaad u leedahay waa inaad ka dalbata dawlada hoose oo eegi doonta, inta qof ee gurigaaga ku nool, lacagta ku soo gasha, guriga aad iminka degan tahay (haddi aad guri degan tahay), guriga sidu yahay iyo waxyaabo kale oo ay ka mid yihin da’da, haddi aad curyaan tahay, xanuun iyo wax yaabo kale oo la mid ah.

**Bal ka soo qad haddi lai yeelo dalbashada guriga?**

Haddi ay dowlada hoose ku ogolaato waxa lagugu dari doona liska dadka guryaha sugaya, marka guri ayaa lagu siin marka lagu heelo.

**Imisa weeyan kirada aan bixinaya?**

Kiradu waxay ku xidhan tahay sida aad u bixin karayso, marka haddi lacagtaadu yar tahay, kiradu way yaaran doonta, haddi aay lacagtaadu biirto, kiradu way biri doonta. Lacagta dadka kale guriga kula degan waa lagu xisaabinaya haddi ay caruur jirta, kiradu way ka yaraanaysa. Xafad waliba xeer gooni ayay leedahay oo ay kirada u xisabiiso.

Dowlada hoose ee xafadaadu waxay leedahay qimo ugu badan iyo mid ugu yar oo ku xidhan guriga intu leeg yahay. Waxaana jirta marmar ay dowlada hoose qofka ka yareen karto kirada haddi aay dhib jirto.

Haddi lacagta ku soo gasha ama qof guriga ku nool lacagtiiso is badasho, waa inaad u sheegta dowlada hoose.

**Wa maxay xeerka la yidhaahdo Equal Status Act oo ku saabsan cadaalad xumo?**

Xeerka la yidhaahdo Equal Status Act 2000 wuxu xarantimaynaya in dadka lagula dhaqmo cadaalad xumo ku saabsan haddi uu qofku yahay nin ama haween, haddi aad xaas leedahay, haddi aad caruur leedahay, rag iyo dumar wuxi oo qofku jecel yahay inuu noloshu la qabsaado, diinta, da’da, haddi qofku curyaan yahay, middabka, ama haddi aad ka mid tahay dadka loo yaqaan “The Traveller Community” o marka u ka hor joogsado guriyeelasho ama iskuulka. Faahfaahin inta ka badan haddi aad u bahato sidi aad u caban lahayd waa inaad eegta internet adreska ah : [www.equalitytribunal.ie/](http://www.equalitytribunal.ie/). Warbixintii oo ku qoran af Ingiriis iyo Polish ama Russian iyo Faransiis.

## **KOONTADA BANGIGA**

**Maxaa lo furta konta baangi?**

Waa talo wanaagsan inaad furato koonto bangiga haddi aad shaqayso oo aad ku nooshahay Ireland. Dad badan aya mushaharka loogu soo shuba kontada waxanay ku fudaydinaysa inaad lacag dhigatiid iyo inaad biilasha bixisid.

**Imisa bangi oo kala duwan aya jira?**

Meelaha lacagta ee Ireland waxay u kala baxaan bangi, shirkadaha dhismaha, ururada amaahda iyo boosta oo iyaduna konto aad ka furan karto.

Bangiga iyo shirkadaha dhismaha waxa kor ka maamula qoloyin maaliyada u xil saaran. Qoladaas aya warbixin ku siin karta website kooda oo ku sheegi karta wuxi aad u bahantahay ([www.itsyourmoney.ie](http://www.itsyourmoney.ie)).

**Maxaan u bahanahay inaan ogaado markaan konto furanayo?**

Markaad koonto furanayso waa inaad ogaata waxa la socdo ee loo yaqaano “services” iyo cashuurta dul socota lacagtaada ee bangigu goosto. Bangiyada intooda badan waa bilaash (shurudo aya ku xidhan) marka waa inaad waraysata bangiga ama meesha kale ee aad ka furato koontada.

**Maxa la yidhaahda “current account”?**

Current account wa koonta caadi ah aad lacagta lagugu soo shubayo, biil aad ka bixinayso. Kaas oo kale waxa laga hela meelo ay ka mid yihin bangiga iyo shirkaada dhismaha (building societies)

**Maxa la yidhaahda “dhiboosit koont”**

Dhiboosit ama “deposit” koont waxa weeyan koont aad lacagta ku urursanayso, lacag aya ku dul socota. Bangiyaada, iyo meelaha kale sida ururara, shirkada dhismaha waad ka heli karta ( banks, credits unions, building societies).

Koonta dhiposit ah marka aad furanayso waa inaad ogaata lacagta kuu dul socota inta ay tahay, iyo sidi aad u heli lahayd lacagtaas marka aad u bahantahay.

**Maxa igu khasbaya inaan aqoonsi eeno?**

Taasi waxa igu khasbaya sidi loo ogaan laha lacagta qofku halkay ka timid waa xeer la yidhaahdo “Criminal Justice Act 1994.

**Sideen u caddeyn kara halka aan ku noolahay**

Warqadaha hoos ku qoran, oo ay qoran yihin magacaaga iyo halki aad ku dhalatay

- Lisanka gaadhiga
- Warqaad shaqo oo meel la yaqaano ah, oo sawir leh,
- Warqaad iskool sare ama jaamacad
- Kaadh sawir leh oo ay soo fidisay An Garda Sióchàna.
- Kaadh sawir leh oo ay soo fidisay An Garda Sióchàna.

**Maxa la iiga bahanyahay sidi aan u caddeyn laha adreskayga?**

Waa hoos ku qoran waa warqadaha caddeyn kara halka aan deganahay:

- Warqad cusub oo ah laydhka, gaska ama telefoonka oo magacaaka ku qoran
- Lisanka gaadhiga
- Kaadh taswir le oo ay bixisay Garda Sióchana qolo la yidhaahdo
- Warqada samafalka oo ay bixiyeen xafiiska soshalka iyo bulshada iyo qoyska oo loo yaqaano Department of Social, Community and Family Affairs.



### Warqad bangi oo magacaaga ku qora?

Meelo badan aya jira oo aad tagi kartid haddi aad furankari weydid koont.

**Talaabo koobaad:** waxaad codsata sidi aad uula hadli lahayd maamule. Haddi aanu ku raali gelin, waxaad la hadli karta, xafiis loo yaqaano “financial ombudsman service”

**Talaabo labaad:** waxaad kala xidhiidhi karta financial ombudsman sevice adreska internet ee [www.financialombudsman.ie](http://www.financialombudsman.ie) waxanad u qori karta ombudsmanka (ombudsman waa qof dadka dhexdhexaadiya) adreska 3rd Floor, Lincoln Place, Dublin 2; by telephone at 1890 88 20 90 or by email at [enquiries@financialombudsman.ie](mailto:enquiries@financialombudsman.ie).

## AKHBARTA RASMIGA AH

### Wa maxay akhbarta rasmi ah ama “utilities”

Waxa weeyan melaha shicibku ka helo laydhka, gaska , biyaha, iyo waxyabo kale, dowlada aya leh laakin wa inaad lacagtooda bixisa.

### LAYDHKA

#### Aya Maamul laydha Ireland haya?

Laydhka Ireland waa soo saara xafiis la yidhaahdo Electricity Supply Board (ESB). ESB waa xukunta dowlada.

#### How do I get the electricity bill in my name?

Sidi laydhka magacaaga loogu qori laha waxaad u bahantahay wax la yidhaado Meter Point Reference Number (MPRN). Sidi aad lanbarka u heesho waxaad weydiin karta qofka aqalka kaa kireyey ama qofka dhisay. Waxaad la hadli karta ESP telefonka ah 1850 372 757 iyaga aya ku micnayn doona sidi aad isku qori lahayd laydhka.

#### Intee jeer ayaan bixinaya biilka laydhka?

Biilka waxa la bixiya labaddi bilood mar

Markaa laydhka lagu keeno 14 cisho dabaadeed ugu dambayn haddi aanad doneyn in laga jaro laydhka.

#### Maxaad uga jeeda mitir akhriis?

Laydhka mitirkiisu ama konteerku waa meesha shegeysa intaa ay laydh ah ee aad isticmaashay. Qof aya soo mari doona aqalka oo eegi doona mitirka. Qofku 4 jeer ayu soo maraya sannadkii/

#### Maxay ka dhigantahay qimaynti isticmaalka laydhku?

Qofka meterka akhriinaya aqalkaaga wuxu imanaya 4 jeer, 6 jeerna waad bixinaysa biilka. Labada goor ee hadhay, ESB waxay qimayn doonta inta aad laydhka isticmaashan ee hore,

#### Sidee ayaan u bixiya bilka laydhka?

Siyaabo badan aya loo bixin kara laydhka:

- Direct debit (lacagta bangiga ayaa lagala baxaya ) xidhiidhku waa kan: [www.esb.ie/directdebit](http://www.esb.ie/directdebit).
- (wa bilaash waxaad eegta boosaha xashida lanbarkeedu yahay 34) ama xafiiska boosta.
- Dukaanada ay ku qoran tahay PayPoint (taasi kash ayunbaad ku bixin karta)
- Telefoonka lanbarka ah 1850 372 372 (Isniin ilaa Jimce 8aroomimo ilaa 8habeenimo).

### Maxaan samayn kara haddi u qofka kooran qoraya aniga oo maqan yimaado?

Haddi aadan joogin waxaad ka sheegi karta konteerku halku joogo internetka:

[www.esb.ie/esbnetworks/domestic\\_customers/metering/submit\\_meter\\_reading.jsp](http://www.esb.ie/esbnetworks/domestic_customers/metering/submit_meter_reading.jsp) ama telefonka ah : 1850 337 777 (Ireland oo kaliya).

#### Sidee ayaan u qori karaya mitirku halku joogo?

Mitirka koonterka qoristiisu waxa weeyan sida gaadhiga mitirkiisa. Waxaad ka heli karta warbixin inta ka badan internet adreska: [www.esb.ie/esbnetworks/domestic\\_customers/metering/read\\_meter\\_reading.jsp](http://www.esb.ie/esbnetworks/domestic_customers/metering/read_meter_reading.jsp).

#### Halkee ayaan la xidhidhaya haddi kooranka iga go'o?

Haddi kooranku ka go'o ama gurmada degdeg ah aan u bahanahay waxaan la hadlaya 1850 372 999 sidee aad uula hadli lahayd qofka warbixin ku siin kara. Waa xafiis aad la hadli kartid 24 saacadood, 7 cisho wiigi.

#### Sidee ayaan u caban kara?

**Talaabo 1:** La hadal xafiska ESB u furan shicibka ee lanbarkiiisu yahay 1850 372 372 ama internet adreska ah [service@esb.ie](mailto:service@esb.ie).

**Talaabo 2:** Haddi aanay sida ku dhaman waxaad u qorto warqad cabasho ah ESB Customer Supply, Complaints Facilitator, PO Box 6, Henry Street, Limerick ama internet adreska ah [complaintfacilitator@esb.ie](mailto:complaintfacilitator@esb.ie).

**Talaabo 3:** Haddi aanad wali ku kalsoonay intaas oo dhan waxaad la xidhiidhi karta xafiska la yidhaahdo Commission for Energy Regulation (CER) at CER, The Exchange, Belgard Square North, Tallaght, Dublin 24; ama telefonka ah (01) 4000 800 ama internetka [info@cer.ie](mailto:info@cer.ie).

## GASKA

### Yaa maamula Gaska Ireland?

Gaaska waxa keena ka guriga iyo ka dhalada waxa weeyan Bord Gais oo ah shirkad ay dowladu leedahayd. Flogas waxa weeyan mid gaska u keen.

#### Sidee ayan u helaya biil gaas oo magacay ku qoran?

Sidi aan gaska u heli lahayd waa inaad telefon u dirta lanbarka ah 1850 632 632 (af Ingiris) ama 1850 633 633 (af Russian, Polish, ama Mandarin)

#### Imisa jeer aya la iso diraya biilka gaaska?

Bilka gaaska waxa la soo dira labadi bilood mar waxanay ku xidhantahay meter akhrinta iyo qimayn isticmaalka ah.

#### Waa inaan goorma bixiyo biilka?

14 cisho waa inaad ku bixisa .

#### Maxah ka dhigantahay mitir akhrintu?

Gaska mitirkiisa waa makinaad aqalka taala o qiyaasaysa inta gas aad isticmaashan sidi loo xisaabin laha lacagta aad bixinayso. Qof ayaa guriga soo mari doona. Saddex goor sannadki ayuu soo mara.

#### Maxay ka dhigantahay qimaynta isticmaalku?

Mitirka ninka qimaaynaya aqalka ayuu soo mari doona 3 jeer, lix biilna waa lagu soo diri doona. Inta kale waxay ka dhaqaaqi doonan biilashi hore ee aad bixisay, sida ayay u qiimayn lacagta aad bixinayso.

## Sidee ayaan u bixin karaya biilka gas?

Siyaabo badan aya loo bixiya gaaska biilkiisa:

- Direct debit (lacagta toos aya bangiga lagala baxaya\*): [www.bordgais.ie](http://www.bordgais.ie);
- Internetka [www.billpay.ie](http://www.billpay.ie) (waa bilaash haddi aad boosta ka gasho) ama boosta
- Dukaano aad ka heleyso calamada PayPoint (lacag cash ah oo keliya ayaad qaatan
- Telefoonka lanbarka 1850 632 632 (afka Ingiriska) ama 1850 633 633 (Russian, Polish iyo Mandarin)

## Maxaan samayn kara haddi qofka mitirka akhriyaya yimado aanan joogin?

Haddi aadan joogin waxad ka galin karta Internetka adreska ah mitirku halku joogo:

[www.bordgaisenergysupply.ie/htm/residential/3\\_existing\\_customer/your\\_bill/submit\\_meter\\_reading/index.htm?open=1#start\\_submit](http://www.bordgaisenergysupply.ie/htm/residential/3_existing_customer/your_bill/submit_meter_reading/index.htm?open=1#start_submit) ama telefonka lanbarka ah: 1850 427 732.

## Haddi aan gaas uriyo maxaan samaynaya?

Haddi uu gaas ii uro waxan telefonka u diraya lanbarka ah 1850 20 50 60 sidi aan u ogeysiyo

Waxa jirta oo kale buug yar oo warbixin kooban ku siinaya oo af ingiriis ku qoran ama af Russian, Polish iyo China oo aad ka heleyso Internet Adreska ah [www.bordgais.ie/corporate/index.jsp?1nID=93&pID=96&nID=687](http://www.bordgais.ie/corporate/index.jsp?1nID=93&pID=96&nID=687).

## Sidde ayan cabasho u fidin kara?

**Talaabo 1:** Telefon ayaad u diraysa Bord Gais customer service telefonka ah 1850 632 632 ama internet kala xidhiidh adreska ah [info@bordgais.ie](mailto:info@bordgais.ie).

**Talaabo 2:** Haddi aad dhaman waydo waxaad warqad u qori karta: The Customer Service Manager, Bord Gáis Energy Supply, PO Box 10943, Dublin 1.

**Talaabo 3:** Haddi aadan wali ku kalsoonayn waxaad u qori karta The Commission for Energy Regulation (CER) at CER, The Exchange, Belgard Square North, Tallaght, Dublin 24; ama telefoonka(01) 4000 800 ama Internetka email adreska ah [info@cer.ie](mailto:info@cer.ie).

## BIYAHA LACAGTOODA

Imaka ahaan biyaha isticmaalkoodu marka ay guriga tahay waa bilaash (cabitaanka, madhista iyo nadafada).

Dowlada way ku tala jirta inay mitiris samayso laakin waali wax jira ma aha.

Haddi aad donaysid sidi aad biyaha aad isticmaasho u yarayn lahayd waxaad eegta adreska internet ah : [www.taptips.ie](http://www.taptips.ie). Adreskan waxaan ka heli karta warbixin sidi aad biyaha u dhaqaalayn lahayd ama aadan uga tagteen biyaha oo socda. Waxay ka shegeysa oo kale sida aad laydhka u dhaqaalayn lahayd.

## QASHIN GURISTA IYO DIIB U ISTICMAALKA QASHINKA

### Ma inaan lacag ka bixiya qashin gurista?

Ha waa lacag, qashin guristu Ireland. Guri walba waa inu bixiya fii sidi

### Ayaa u xilsaaran xashin gurista?

Qashin gurista waa u xil saaran dowladada hoose ee degmo walba, markaas lacagtuna waay kala duwan tahay. Haddi aad warbixin inka ka badan aad donaysid waxaad su'aasha maamulka degmada aad degan tahay ama Internet adreska ah [www.epa.ie/whatwedo/resource/regional/](http://www.epa.ie/whatwedo/resource/regional/).

### Sidee qashinka loo gura?

Qashinka waa gura dowlada hoose ama qof shirkad ayaa loo xil saara. Qolada u xil saran ayaa ku siin doonta baaldi shagag leh marka baco madow ayaaa ku ridi meelo qaar tidhidh aad ku dhajiso baaldiga ayaa lagu siin markaad dibada u soo sarayso.

Maalin gaar ah oo wiiga ah aya la soo doona marka qolada ku xil leh ama dowlada ha ahaato ama shirkad iyaga aya ku sheegi maalinta la gurayo qashinka. Listka shirkadaha waxaad ka heli Internet adreska ah: [www.enfo.ie](http://www.enfo.ie).

### Qashin dib u isticmaalistu maxay ayay ka dhigantahay?

Meelaha qaar, guryaha waxa la siiya baaldi akhtar ah sidi loogu ridi laha qashinka inta dib loo isticmaalayo. Taasi waxay ku tirsan tahay kharashka aad qashin gurista ka bixinayso. Qashinka waxaad iskaga yarayn karta markaad in badan dib u isticmaalis ka dhigto

### Maxaan dib u isticmaali karaya?

Waxaad dib u isticmaali karaysa waa waxa ku jira baaldi akhtarka ah gud ahaan waxaad dib u isticmaali karaysa warqad, qori, kadhloodh, iyo waxwax blastik ah.

Warbixin inta ka badan waxaad ka heli karta : [www.repak.ie](http://www.repak.ie).

### Sidee kale aayan u habeyn kara dib u isticmaalida qashinka?

Sidee kale waxa weeyan adiga oo bangi geeya wixi dib loo isticmaali karo oo dhan, waa meel kale oo baldi ama konteyner yaalan, marka meelaha qaar dhar duug ah aya lagu ridi kara. Meelaha waxa loo yaqaana "bring bank":

Warbixin inta ka badan waxaad ka heli karta adreska internet e ah: [www.repak.ie/bring\\_banks.html](http://www.repak.ie/bring_banks.html) ama waxaad ka heli karta macdaarada waaweyn ee wax laga ibsado.

## WADANKA SOCSOCODKIISA

### GAADHI WADITAANKA IRELAND

#### Maxaan u bahanahay sidi aan gaadhi uugu wadi laha Ireland?

Haddi aad u soo gurayso northern ireland ama aad ku nooshahay oo aad gaadhi ka soo keneysa meel kale, sadex shey ayaad u bahantahay sidi aad u wadan lahayd gaadhiga

- Waa inaad haysata lisanka gaadhi
- Waa inaad bixiso cashuur la yidhaahdo Vehicule Registration Tax (VRT) (adiga oo laga dhafo mooyan)
- Insurance gaadhiga
- Gaadhiga cashuurtiisa

### Miyaan isticmaali karaya liisan kaygi hore?

Haddi uu liisan yahay mid EU ama EEA wadanada ka tirsan waa lagu badii karaya. Ireland waxay la leedayah heeshisyo wadanada EU ama EEA iyo wadano kale oo ah (Australia, Japan, South Africa, South Africa iyo Switzerland).

### Haddi aanu liisankaygu waddanada ahayn

Haddi aad jogayso Ireland 12 bilood in ka badan oo aadan ka iman wadan dul ku qoran waa inaad wadiisata Ireland liisanka gaadhiga haddi aad donayso inaad gadihi ku wado Ireland.

### Sidee ayaan u hela Lisan Ireland Ah?

Waa inaad marka hore soo soo marta imtaxan qoraal ah oo ku saabsan sida gaadhiga loo wado, aad dalbataa inaad gaadhiga wado oo imtaxaan wadista ah aad marta. Haddi aad imtaxan ku gulaysato waa heli doonta lisan buuxa oo aad Ireland ku wadan karto gaadhi.

### Kali miyaad ku wadi kara lisan ku meel gaadh ah?

Maya, waa inu qof lisan 2 sannadood inka badan haystay ku raaca.

### Maxaa la yidhaahdo Imtaxaanka NCT?

Waxa la yidhaahdo National Car Test (NCT) waa jeking loo samaynayo gaadhi sidi aad uugu wadan lahayd Ireland haddi uu gaadhigaagu ka weyn yahay 4 sannadood. 43 meelood aya jira oo jekin ka lagu sameeyo. Waaxaad ka heli karta warbixin inta ka badan adreska internet ah : [www.ncts.ie](http://www.ncts.ie).

## GAADIDKA DALKA

### Aya maamula gaadidka dalka ee Ireland?

Gaadidka dalka ee Ireland waxa maamula CIE koox la yidhaahdo. CIE waxay ka maasul tahay basaska magalaada, kuwa dhex mara magalada iyo tareenka. Waxa jira shirkaado private ah oo ka shaqaysta gaadidka dalka waliba eeriyaada Dublin.

### Maxa ah inaan ogaado oo ku saabsan basaaska?

Dublin bus waxay ka maasul tahay basaska Dublin iyo North Wicklow. Waxa jira dariiqo kala duwan oo ay basasku maraan. Waxaad ka heli karta sacadaha ay soo maraan internet adreska ah [www.dublinbus.ie](http://www.dublinbus.ie) ama xafiska at 59, Upper O'Connell Street (telephone 01 873 4222). Sacadaha u faran yahay waa:

- Isniin 8.30a.m - 17.30p.m
- Salaasa ila Jimce 9.00a.m. - 17.30p.m
- Sabti 9.00 - 13.00pm

### Waa imisa lacagta lagu raaca?

Lacagtu way kala duwan tahay waxana ay ku xidhan tahay halka aad tageyso iyo haddi aad tigidh sidato iyo haddi aad kash ku bixinayso. Haddi aad baska ku bixinayso waa inaad lacagti oo go'an sidata (haddi aad lacag ka badan sidato waxaad ka doonan baaqiga Dublin Bus Office oo ku yaala O'Donnel Streetà

Caruurto (16 ka yar) lacagta aay bixinayaan waxay u dhaxaysa 60c ila 95c. Dadka waaweyn lacagta ay bixinayaan waxay u dhaxaysa €1.05 iyo €4.30 ;

### Miyaa la igu soo diri kara sacadaha buska Mobile telefonka?

Haa Dublin baskeeda haddi aad garanayso meeshu basku maraya waxaad diri karta farin iyo lanbar dariiqo u marayo lanbarka ah 53503. Lacagta kaaga baxaysa waa 30c.

### Sideen bas ugu raaci kara magalo kale?

Bus Éireann waxay maasul ka tahay basaska ka baxa Dublin dibadeeda iyo basaska magaloyiinka kale u kala basa ee Ireland dhexdeeda. Tigidhka waxaad ka goosan karta internet adreska [www.buseireann.ie](http://www.buseireann.ie) ama bas station ka kuugu dhow.

### Sideen u heli kara tareen magalo kale u baxa?

Iamród Éireann waxay maasul ka tahay tareenada Ireland. Waxa jira meelo kala duwan ay tareenadu u kala baxaan; waxaad ka ibsan karta internet adreska [www.irishrail.ie/home/](http://www.irishrail.ie/home/) ama tareen station ka kuugu dhow

## WAR ISGAADHSIINTA

### Maxa La Yidhaahda War Isgaadhsiinta

War isgaadhsiintu wa siyaabo badan oo ay dadku u wada xidhiidhan marka ay kala fog yihiin. Waxa ka mid ah, telefshanka, internetka iyo telefoonka.

## TELEFISHANKA

### Imisa Janal aya jira?

Ireland waxa jira 3 telefshan oo ay dawladu leedahay – RTE One, RTE two (oo loo yaqaano Network 2) iyo TG4 (oo barnaamijkeedu Irish yahay). Waxa kale oo jira laba janal oo Irish ah –TV3 iyo Channel 6.

### Janal ku maa bilaash baa?

Guri walba oo TV haysta waa inu hayta lisan wax la yidhaahdo waa inu lacag bixiyo xitaa haddi aanad daawan janalka dowlada.

### Halkee ayaan ka heli kara lisanka?

Lisanka lacagtiisu imika ahaan waa €160 sannadki. Waxaad ka ibsan karta boosta ama internetka: <https://www.tvlicence.ie/homepage.aspx> ama telefonka : 1890 228 528.

### Maxa jira haddi aan bixin waayo lisanka?

Dadka ayaa jira u xil saaran oo guryahay dadka yimaada oo jeek gareeya inay lisan haystaan iyo in kale, haddi lagu qabto takhsir ayaad bixinaysa ama jeel ayaad tagaysa.

### Sidee ayaan u heli kara janallo kale?

Dad Badan Aya Northern Ireland Lacag Dheerad Ah U Bixiya Janalkale Wax Laa Yidhaahdo Cable Iyo Satellite, Oo Janal Kale Ku Soo Gudbinana:

- SKY;
- NTL/Chorus (UPC).

Warbixin Inta Ka Badan Waxaad Ka Heli Internetka:| [www.sky.com/Ireland](http://www.sky.com/Ireland) Ama [www.upc.ie](http://www.upc.ie).

## TELEFOONKA

### Wa maxay koodhka Ireland?

Lanbarka internationalka ah ee Ireland waa 00353. Waxay ka dhigantahay inaad haddi aad dibada joogto oo aad donayso inaad lasoo hadasho Ireland waa inaad samaysa 00353 intaa aadan lanbarka inta kale garaacin.

### Sidee ayaan u heli kara koodh Ireland dhexdeeda ah?

Waa leedahay eria walba koodh u gaar ah. Haddi aad guriga ka hadlayso waxaad u bahantahay inaad samaysa eria koodh haddi aad meel kale joogto. Mobile haddi aad ka hadlayso waxaad u bahantahay inaad lanbarkii oo dhan samaysa iyo waliba eria koodhka. Eeria koodhka waxa laga hela bugga telefoonada oo guryaha telefoonka leh bilaash loo siyo. Ama waxaad ka heli karta internet adreska ah [www.eircomphonebook.ie](http://www.eircomphonebook.ie) ama warbixin kale haddi aad donayso [www.goldenpages.ie](http://www.goldenpages.ie).



## Sidee ayaan u dhigaankaraya telefoon guri?

wa inaad la xidhiidha kumbani soo tabisa telefoonka. Sida marka aad kont furanayso waa inaad soo caddeysa halka aad degan tahay iyo qofka aad tahay. Warbixin inta ka badan waxaad ka heli karta: [www.askcomreg.ie/home\\_phone/Telephone\\_Ireland.LE.asp](http://www.askcomreg.ie/home_phone/Telephone_Ireland.LE.asp)

## LANBARKA EMERGENCYGA

Emergency lanbar oo bilaash ah : 999/112

Operator assistance (free): 10

Waa qof aad su'aalo kala duwan aad weydiinkarto, lanbar ayay ku sheegi karan wuxu yahay, ama sidi aad telefon ugu diri lahayd meel

Directory enquiries 11811/11890/1185

Directory Lanbar 1181/11890/1185

Wa lanbar aad weydiinkarto lanbarka aad u bahantahay, bilaash ma aha lanbarku, haddi aad mobile ka telefooniso qaali ayu kugu noqodoona.

Ogaysiis : Bugga telefoonka waa ku yaala warbixin badan, emergency iyo lanbar aad caawimo ka heli kartid.

## MOBILE PHONES

Imiso shirkaadood oo mobile phone ayaa jira Ireland?

Waxa jira afar shirkadood Ireland:

- O2 — 086 ([www.O2.ie](http://www.O2.ie));
- Meteor — 085 ([www.meteor.ie](http://www.meteor.ie));
- Vodafone — 087 ([www.vodafone.ie](http://www.vodafone.ie));
- 3 Mobile — 083 ([www.3mobile.ie](http://www.3mobile.ie)).

Afarta shirkadood waxyaabo kala duwan ayay kuu soo sharaxayaan, waxa aad dooran karta inaad lacagta bixiso marka aad isticmaasho, ama bil ayaad ku bixinkarta, waxa aay ku xidhantahay inta lacag ah ee aad donaysta inaad ku bixiso mobilka iyo sida aad u isticmaasho.

Miyaan badali kara shirkada mobilka aniga oo aanan badalin lanbarka?

